



Xeer Madaxweyne Lr: 027/06/2018

Tr: 14th June 2018

Ansixinta Miisaaniyadda 2018 iyo Xeerarka Maaliyadda

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug

Markuu Arkay: Qodobka 50^{aad} faqraddiisa 12^{aad} ee Dastuurka Dowlad Goboleedka Galmudug;

Markuu Arkay: Warqadda Gudoomiye Kuxigeenka golaha sharci dajinta Galmudug ee lambarkeedu yahay GBG/71/06/2018 ee 14/06/2018 kuna saabsan ansixinta Miisaaniyadda 2018 iyo xeerarka kale ee la xiriira maamulka maaliyadda, dakhli ururinta iyo xeerka lagu dhisay wasaaradda maaliyadda;

Markuu Tixgaliyey: Baahida loo qabo in la dardar galiyo hawlaha maaliyadeed ee dowladda;

Wuxuu Soo Saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga billaabo manlinta uu Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug saxiixo xeerkan wuxuu Madaxweynuhu ogolaaday ansixinta miisaaniyadda 2018 iyo xeerarka kale ee la xiriira Maamulka Maaliyadda, Dakhli Ururinta iyo Xeerka Lagu Dhisay Wasaaradda Maaliyadda.

Qodobka 2aad

Xeerkaan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug.

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug

Mudane Axmed Ducaale Geelle

